

لا إله إلا الله



القيادة العسكرية

ARMED FORCES COMMAND  
TALISKA CIIDANKA

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
لِلنَّشْرِ الْعَاجِلِ

FOR IMMEDIATE RELEASE



حركة الشباب المجاهدين

HARAKAT AL-SHABAAB AL MUJAHIDEEN  
XARAKADA MUJAAHIDIINTA AL-SHABAAB

## “Cagmarinta Saldhigyada Murtadiinta ee Jubada Hoose”

**16 Muxarran 1446 H (22 Julay 2024)** - Ciidamada Mujaahidiintu waxay saakay oo Isniin ah weeraro cagmarin ah ku qaadeen saddex [3] saldhig oo ay murtadiintu ku leeyihiin deegaano kamid ah wilaayada Jubada hoose. Saddexda saldhig ee ay Mujaahidiintu weerareen ayaa kala ah:

- 1- Saldhigga deegaanka Harboole oo 90 km waqooyi-gableed uga beegan Kismaayo.
- 2- Saldhigga deegaanka Buula-xaaji oo 80km koonfur-galbeed uga beegan Kismaayo.
- 3- Saldhigga Miido oo 95 km uga waqooyi-galbeed uga beegan Kismaayo.

Saddexda saldhig ee ay Mujaahidiintu cagta mariyeen waxaa ku kala sugnaa ciidamo murtadiin ah oo isugu jira waxa loogu yeero federaalka, iyo kuwa Jubaland. ciidamada murtadiinta ee ku sugnaa saldhigyada saddexda ah ee la weeraray waxay gaarayaan 2,500 (Laba kun iyo shan boqol) oo askari, kuwaas oo qayb ka ahaa duullaanka ashahaado la dirirka ah ee ay salibiyiinta iyo murtadiintu ku soo qaadeen dalka iyo dadka Soomaaliyeed ee Muslimiinta ah. Dagaalka waxaa qayb ka ahaa diyaradaha salibiyiinta kuwaas oo hawada ka taageerayay murtadiinta, balse Allaah fadligiis Mujaahidiinta ayaa ku taqadumay difaacyada cadawga.

Dagaal kadib, Mujaahidiintu waxay –Allaah fadligiis- si buuxda ula wareegeen saddexdii saldhig ee ay murtadiintu kaga sugnaayeen deegaanada Harboole, Miido iyo Buula-xaaji. Dhinaca kale, ciidamada Mujaahidiinta ayaa kamiin u dhigay murtadiin gurmada ah oo marayey deegaanada Yoontooy iyo Cabdalla biroole ee duleedka Kismaayo.

Khasaare xooggan ayaa cadawga lagu gaarsiiyay weerarada cagmarinta ah ee ka kala dhacay Harboole, Miido, Buula-xaaji, iyo kamiinada ka kala dhacay deegaanada Yoontooy iyo Cabdalla biroole. Dhimashada hordhaca ah ee cadawga la gaarsiiyay waa 71 murtad oo lagu dilay weerarada cagmarinta ah iyo kamiinada lagu beegsaday gurmada. Waxaa kale oo jira dhaawac intaas ka badan.

Cadawga goobta dagaalka lagu dilay iyo kuwa lagu dhaawacay waxaa kamid ah saraakiil iyo masuuliyiin muhiim u ahaa dagaalka ashahaada la dirirka ah ee ay salibiyiintu ka wadaan Soomaaliya, kuwaas oo ay rasaasta Mujaahidiintu haleeshay. Waxaa sidoo kale cadawga laga qabtay maxaabiis dagaal oo hadda ku jira gacanta Mujaahidiinta. Sidoo kale Mujaahidiintu waxay dagaalka kula wareegeen, gaadiid, hub iyo saanad ciidan oo cadawga laga qaniimaystay.

Ciidanka Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay ballan ku qaadayaan inay sii wadi doonaan Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee salibiyiinta iyo dabadhilifadooda murtadiinta ah illaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyaan cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhamaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri:

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنْ انْتَهَوْا فَلَا عُدْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة: 193]



﴿ وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾

*“But honour belongs to Allah and His Messenger, and to the Believers; but the Hypocrites know not”*